

Waxbadan ka baro OPA

Booqo bartayada internetka
seattle.gov/OPA

Nagala soco

Na soo wac
206-684-8797
@SeattleOPA

This brochure is about how to file a complaint with the Office of Police Accountability. If you would like to receive it in languages other than English call 206.684.8797.

這本手冊將介紹如何向警察責任辦公室提出投訴。如果您想獲取[繁體中文]版本，請致電 206.684.8797。

这本手册介绍了如何向警察责任办公室提出投诉。如果您想获取中文版本，请致电 206.684.8797。

Este folleto trata sobre cómo presentar una queja ante la Oficina de Responsabilidad Policial. Si desea recibirla en español llame al 206.684.8797.

Phiếu thông tin này nhằm hướng dẫn cách gửi đơn khiếu nại đến Phòng thẩm định trách nhiệm cảnh sát. Nếu Quý vị muốn nhận bản tiếng Việt, vui lòng gọi số 206.684.8797.



Seattle Office of
Police Accountability

@SeattleOPA

Waa maxay OPA?

Xafiiska La Xisaabtanka Booliska oo loo soo gaabiyo afka Ingriiska OPA waxuu mas'uul ka yahay in uu habeeyo oo socodsiiyo eedeymaha anshax darrada ah ee ay ku lug leeyahiin shaqaalaha Waaxda Booliska Seattle oo loo soo gaabiyo afka Ingriiska (SPD). Wuxaan sidoo kale bulshada kala tashanaa kormeerka booliiska, waxaana ku talineynaa in dib u baaris lagu sameeyo siyaasada SPD, iyo in aan la socono xooga ama awooda ay booliisku adeegsanayaan. Wuxaan ka shaqeynnaa meel ka baxsan xafiisyada SPD waxaana leenahay hoggaamiye rayid ah. Shaqaalaheena waa isku dhaf ka kooban madani iyo saraakiil ka tirsan SPD.

"Shaqaalaha SPD" waxaa loola jeedaa qof kasta oo u shaqeeya Waaxda Booliska Seattle, oo ay ku jiraan shaqaalaha madaniga ah iyo kuwa loo dhaariyey in ay fuliyaan sharciga, shaqaalaha xafiiska 911 / eemadaniga, saraakiisha qaabilسان goobaha baabuurta la dhigto iwm.



Miyaa cabashadayda lagu xallin karaa dhexdhedaadin?

OPA waxay u doorataa cabashooyinka dhexdhedaadin joogta ah oo ku saleysan cabashooyinka la jaan qaada dhaqamada ugu wanaagsan ee qaranka. Tan waxaa ka mid ah nooca qiimeynta iyo xajmiga ay leedahay eedeynta, iyo sidoo kale suuragalnimada in lagu guuleysto in xal laga gaaro. Haddii aad diyaar u tahay in aad ka qeybgashid wadahadal — oo uu hogaaminayo dhinac saddexaad oo dhexdhedaad ah — iyo shaqaalaha SPD ee aad kadacwoonayso, fadlan nala soo socodsii.

Si aad wax uga ogaatid barnaamijka dhexdhedaadinta OPA, booqo bartayada internetka ee seattle.gov/opa/complaints/mediation-program.

Dhexdhedaadintu waa arrin ikhiyaari ah, waana hab soo jireen ahaa oo loogu xaliyo cabashada. Wuxaan la adeegsanaya dhexdhedaadiye xirfad leh si loo caawiyo xubnaha bulshada iyo SPD.

Xafiiska La Xisaabtanka Booliska

Sida loo soo gudbiyo Cabashada



Seattle Office of
Police Accountability

Wax badan ka baro hawsha aan qabano
seattle.gov/opa

Waa maxay cabasho?

Xafiiska La Xisaabtanka Booliska (OPA) wuxuu socodsiyaa edeeymaha anshax darrada ah ee ay ku lug leeyihiin Shaqaalaha Booliska Seattle (SPD). Xadgudubyadu waxay u dhaxeyaan dhaqamada xirfad xumada, midab-kala-sooca iyo isticmaalka awood dheeraad ah.

Yaa eedeynta soo gudbin kara?

Cid kasta ayaa soo gudbin karta cabasho; waxaana loo soo gudbin karaa si qarsoodi ah. Waaan kaloo ogolaanaa cabashooyinka ka yimaada hayadaha dibadeeda ama markhaatiyaasha ka wakiil ah dad kale.

Dacwad gudbinta ma tahay mid aamin ah?

Waaan damacsan nahay in howsheena ay noqoto mid aamin ah. Gudbinta ama gaarsiinta macluumaadka qof ahaaneed waa mid ikhiyaari ah. Laguma weydiin doono sharciga aad ku joogto wadanka. Uma baahnid in aad lahadasho shaqaalaha aad ka xereynaysid cabashada.



Sideen baan u xareyaa cabashada?



KU SOO GUDBI FOOMKA
seattle.gov/opa



EMAIL NOO SOO DIR
opa@seattle.gov



NA SOO WAC
206-684-8797



NA SOO BOOQO
720 3rd Ave. Floor 18

Maxaa dhacaya kadib markaan cabashada u gudbiyo ama ka xareeyo OPA?

OPA ayaa dib u eegisku sameyn doona oo go'aamin doonta haddii ay u baahan tahay baaris ama haddii kormeeraha shaqaalaha uu xallin karo. Waaan ku siin dooncaa kiis lambar si aad ugala socotid cabashadaada khadka tooska ah. Dambi baarahaa OPA wuxuu markaas isku dayi doonaa in uu kula soo xiriiro si uu kaaga helo macluumaad dheeri ah.

Nidaamka baaritaanka

1 Dambi baarahaa OPA wuxuu aruuriyaa caddeyn wuxuuna sameeyaa waraysiyo



2 Agaasimaha OPA wuxuu dib u eegaa kiiska wuxuuna talo iyo natijjooyinka baritaanka u soo gudbinayaa Taliyaha Booliska



Maxaa dhacaya haddii cabashadeydu u baahan tahay baaritaan dheeraad ah?

Dambi baaruhu wuxuu samayn doonaa shaqo dheeri ah oo ku saabsan dacwadda, taas oo guud ahaan ka mid noqon doonta wareysiga lala yeelanayo shaqaalaha ku lugta leh.

Agaasimaha OPA wuxuu eegi doonaa kiiska oo wuxuu talo soo jeedin iyo waxyaabahii uu soo helay u gudbinayaa Taliyaha Booliska. Madaxa Booliska ayaa gaari doona go'aanka kama dambeysta ah – isagoo tixgelinaya awoodda aan geliney baritaanka-haddii (iyo waxa) iyo in edbinta lagu soo rogi karo iyo in kale. Waaan kuu soo diri dooncaa warqad si aad noola wadaagtid macluumaadkan.

Waaan isku deyi doornaa in aan xallino cabashada si dhakhso ah, oo dhammeystiran, oo ujeedo leh. Baaristu guud qiyas ahaan waxay qaadataa ilaa lix bilood.

3 Taliyaha booliiska ayaa gaara go'aanka ugu dambeeya



4 OPA waxay u soo direysaa qofka cabanaya warqada soo koobeysa waxii natijjadaka soo baxay

